Somaliska

Quseeyso carruurta da’dooda tahay 7 ilaa 20 sano:

Dugsiga aasaasiga iyo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman

Skolverket

Sidaan buu yahay nidaamka dugsiyada iswiidhishka.



Wixi ka bilaawdo markuu canugaada buuxiyo hal sano, wuxuu kuu dhigankara dugsiga xannaanada. Ciyaarta aad muhiim u tahay markey noqoto dug-siga xannaanada. Markuu canuga buuxinaayo 6 sano, bey dhammaan carruurta bilaabikaran fasalka ardeyda lix sano jirka. Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyda lix sano jirka waa arrin ah tabarruc.

Dhammaan carruurta waxey bilaabaan dugsiga aasaasiga markey gaaraan 7 sano, oo in ey dhigtaan waa qasab. Sharciga oo waajibaadka dugsiga wuxuu ardeyga qasab ku tahay fasalka 1 ilaa 9, oo waa sagaal sano.

Markaas kadib dhallinyarada waxey saddax sano dhigtan dugsiga sare. Dhammaan xaq bey u leeyihiin iney bilaabaan dugsiga ilaa sanadka ey buuxinaay-aan 20 sano. Dugsiga sare ardeyga wuxu u diyaarin inuu dhigankaro waxbarasho jaamacadeed, ama toos shaqo u bilaabo.

Dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman Quseeyo carruurta iyo dhallinyarada maskaxda curyaanka ka ah.

Dugsiga aasaasiga oo sagaalka sano ah in la dhigto waa qasab Iswiidhan. Carruurta inta ugu badan waxey bilaabaan fasalka 1 dayrta sanadka ey buuxinaayaan 7 sano. Sanadka waxbarashada labo qeyb buu kala yahay, hal waa xilliga dayrta iyo hal waa xilliga guga.

Carruurta oo maskaxda curyaanka ka ah weey ku adag tahay iney dhigtaan dugsiga aasaasiga oo carruurta caadiga ah. Sidaas daraadeed carruurta waxey dhigankaran dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman. Waa waxbarasho dugsiyeed oo ardeyga siineeyso waxbarasho ku habboon, ayadoo ardeyga baahidiisa waxbarashada lagu waafajinaayo. Ardeykasto wuxu xaq u lee yahay inuu dugsiga waxbarashada horumar ka gaarikaro iyo farxad horumarka ka qaadikaro.

Hadii ardey oo dhigto dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman, oo shuruudaha aqoonta ku guuleysan waayo, ardeyga xaq wuxu u lee yahay in labo sano oo kale waxbarashada sii dhigto.

Inta ardey uusan bilaabin dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman waa in la suubiyaa baaritaan. Baaritaan waxbarashada ku saabsan, mid cilmi nafsiga ku saabsan, mid caafimaadkiisa guud ku sabsan iyo in la qiimeyso wada xiriirida bulsho ahaan. Dugsiga waa in uu waalidka la tashtaa, iyo waa inaa adiga oo waalidka ah oggolaataa arrintaas intaa canuga laga diiwaangalin. Ilaa inta suurtagal ah waa in laga wardoona ray'iga canuga.

Waxbarashada oo dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman waa in ardeyga siisaa horumarin shaqsiyan, wada xiriir bulshada kale iyo siduu nolosha wadanka uga qeyb-qaadan lahaa.

Markuu ardeyga dhameysto dugsiga ardeyada caqliga dhiman, wuxu waxbarashada ka sii wadankara afar sano oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman. Laakin dugsiga sare wuxu dugsiga aasaasiga uga duwan yahay in dhigashada ey tahay tabarruc. Hadafka baa wuxu yahay inuu ardeyga oo bartp shaqo oo noloshiisa ka shaqeyso.

Labada dugsi, kan aasaasiga ah iyo dugsiga sare, waxbarashada waa lacag la'aan. Taasna micnaheeda tahay in adiga oo waalidka ah aadan waxbarashada, buugag iyo qalabka waxbarashada aan wax lacag ah lagaaga qaadaneen.

Dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman canuga baa lagu waafajin

Dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman waxey canuga siinaayaan tababar wanagasan oo markaas aqliga ardeyga u dhigmo. Ardeyada maadooyin waa loo dhigaa. Waxbarashada waxey u dhisantahay manhajka waxbarashada, laakin shuruudaha aqoonta iyo heerka iney waxbarashada ka gaaraan laga rabo baa kala duwan. Dugsiga oo ardeyada caqliga dhiman qeyb kamid ah baa loo yaqaan dugsiga tababarka. Ardeydaasna waxaa ku adag in waxbarashada qeyb kamid ama dhammaan waxbarashada eysa ka soo bixikarin.

Shahaado iyo caddeynta waxbarashada oo dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman

Hadii ardeyga ama waalidka ey soo codsadaan ardeyga waa lagu siinkara shahaado maadooyinka oo ka dhigtay dugsiga oo ardeyada caqliga dhiman, lix-dii bilood hal mar wixi ka bilaawdo fasalka 6 ilaa 9.

Shahaadada waxey lee dahay shan darajo markey noqoto dugsiga aasaasiga iyo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman: A, B, C, D iyo E. Darajada shahaadada ugu sareyso waa A iyo tan ugu hooseyso waa E. Hadii ardeyga oo gariwaayo shahaadada E, ardeyga lama siinaayo shahaado. Shahaadada oo darajada F ama xariiqin lama isticmaalo.

Markey dhammaan ardeyada waxbarashada dugsiga u dhammaato waxa la siin caddeynta waxbarashada oo dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman, oo waxa kale la siinkara qiimeyn ilaa heerka waxbarashadooda.

Dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman

Degmada aad ku nooshahay baa koow go'aamineyso hadii ardeyga uu kamid yahay kooxda xaqa u leh iney dhigtaan dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman. Go'aankaas waa inuu asalkiisa ku dhisnaadaa baaritaan oo sida camal dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman.

Barnaamishyada lagu dhigo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman

Dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman waxaa la dhigtaa afar sano. Waxa kala dalbankarta barnaamishyada oo qaranka ama kuwa shaqsiyanka ah. Hadafka oo waxbarashada wuxu yahay inuu ardeyga shaqo ka shaqeeynkaro ama waxbarasho sii dhigto. Ardeyga aan dhigankarin barnaamishyada oo waxbarashada qaranka wuxu dhigan barnaamishka oo waxbarashada shaqsiga. Barnaamishka oo waxbarashada shaqsiga waxaa lagu waafajin ardeyga awoodiisa iyo baahidiisa.

Waxbarashada waa in ey ahaata mid kordhineyso wax la wadaagida bulshada. Waa in ardeyga horumar laga gaarsiiyaa siduu u noqon lahaa qof isku filan iyo bulshada kale wax u lawada baran lahaa. Ardeykasto waa in la siiyaa qorshe waxbarasho.

Barnaamishyada waxbarashada oo qaranka oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman

- Maammulka, ganacsiga iyo adeega alaabta
- Arrimaha fanniga
- Guryaha, dhismooyinka iyo wax dhisida
- Daryeelka baabuurta iyo rarida alaabta
- Farsamo gacmeedka iyo wax soo saarida
- Hodheelada, makhaayadaha iyo foornooyinka
- Caafimaadka, daryeelka iyo xannaaneynta
- Mushtamaca, dabeecadda iyo luqada
- Dhirta, dhulka iyo xayawaanada

Maadooyinka lagu dhigto barnaamishka oo shaqsiga

- Estetisk verksamhet
- Hem- och konsumentkunskap
- Idrott och hälsa
- Natur och miljö
- Individ och samhälle
- Språk och kommunikation

Taasna waxaa sii dheer barnaamishyada bilaawga oo loogu talagalay ardeyda ka soo gudbeen dugsiga aasaasiga oo ardeyada caqliga dhiman. Barnaamishyadaas waxey ku saabsanaan karan bilaaw shaqo barasho ama bilaaw luqad barasho.

Sidaan baa waxbarashada loo qorsheeyay

Waxbarashada oo barnaamishyada qarank oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman waxey ka koobanyihiin maadooyinkaan oo ah dhowr koorso.

- Maadooyinka qaarkood barnaamishada waa lagu wada dhigtaa. Maadooyinkaas waa ingiriska, arrimaha bilicga ah, taariqda, isboortiga iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, diinta, cilmiga bulshada iyo iswiidhishka iyo iswiidhishka oo luqada labaad.

- Ardeyga wuxu dhigan dhowr maado oo markaas qaas u ah barnaamisha uu dalbaday. Barnaamishkasto wuxu lee yahay koorsooyin oo waxbarashada sii kordhineyso. Koorsooyinkaasna waxaa loogu talagalay in ardeyga oo aqoon badan ka sii helo hal shaqo ama maado.

- Ardeyga waa inuu xitaa dalbadaa labo koorso oo kamid ah koorsooyinka qaaska.

Dhammaan koorsooyinka qeyb kamid ah waxa lagu dhigan meel oo shaqo. Waxbarashada oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman waxa lagu dhigankara meel shaqo, oo shaqada waxa ka baranee qof markaas shaqeynaayo. Taasna micnaheeda tahay in waxbarashada kala barkeeda aad ku dhiganeysid goob shaqo.

Shahaado iyo caddeynta waxbarashada oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman

Shahaadada waxey lee dahay shan darajo markey noqoto dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman: A, B, C, D iyo E. Darajada shahaadada ugu sareyso waa A iyo tan ugu hooseyso waa E. Hadii ardeyga oo gariwaayo shahaadada E, ardeyga lama siinaayo shahaado. Shahaadada oo darajada F ama xariiqin lama isticmaalo.

Dhammaan ardeyda dhigtaan barnaamishyada oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman waxbarashadooda maxey ku soo dhameynaayaan in hal madaraaso shaqo ahaan soo diyaariyaan. Taasna waxey muujineysaa waxa uu ardeyga yaqaan iyo waxa uu bartay.

Markuu ardeyga dhammeyo dugsiga sare waxa la siin caddeynta waxbarashada oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman, oo caddeyntaas waxaa ku qornaanaayo ardeyga waxyaabaha la baray iyo shahaadooyinka la siiyay.

Dalbashada dugsiga

Markaa rabtid inaa dalbatid dugsi iyo barnaamish waxa la xiriirikarta shaqaalaha jideynta waxbarashada iyo shaqooyinka, waxa ka helee dugsiga aasaasiga iyo dugsiga sare.

Ardeyga wuu dalbankara dugsiga oo rabo, ha ahaado mid degmada ama degmada bannaankeeda. Degmada aad ku nooshahay waxey leedahay dugsiyo ey mas'uul ka yihiin, laakin weey jiraan xitaa dugsiyo oo shaqsi iska leeyahay. Dugsi shaqsi ah waxaa mas'uul ka ahaan karo shirkad, hey'aad samafal ama urur. Dhammaan dugsiyada waxaa lagu dhigtaa lacag la'aan, taasna micnaheeda tahay in waxbarashada lacag la'aan ey tahay, oo markey noqoto aqoonta iyo shuruudaha aqoonta waa sida camal dugsiyada oo degmada mas'uulka ka tahay. Ardeyada oo dhigtaan dugsiga sare oo ardeyada qaaska ah waxey xaq u leeyahiin in loo dheereyo lacagta carruurta. Hadii oo ardeyga dhigto barnaamishka bilaawga ah waa inuu markaas qaataa lacagta waxbarashada. Ardeygii rabo inuu dugsi degmo kale ka dhigto ama dugsi ey shirkad iska leedahay waa inuu codsi u dirsadaa degmada uu ku noolyahay. Marar baa waxa dhicikarto in lacagta meesha aad ku nooshahay lagaa bixiyo.

Ardeyga baa waxbarashadiisa mas'uul ka ah iyo go'aaminaayo

Dhammaan ardeyada waa ey ka qeyb-qaadankaran go'minta waxbarashadooda, iyo mas'uuliyada waxbarashadooda. Dugsiga wuxu ku dhisanyahay dimuqraadiga iyo xuquuqda binaadinimada, isku si waa in loo xushmeeyaa, sida nolosha bulshada wadanka.

Ugu yaran lixdii bilood hal mar waa in ardeyga iyo waalidka la kulmaan macallinka oo laga wada hadlaa waxbarashada ardeyga. Markaasna waxa laga wada hadli sida uu ardeyga waxbarashada ku yahay. Hadii uu dugsiga ku faraxsanyahay, taasna ardeyga waxey siin fursad uu waxbarashada dugsiga fikrad ugu darsankaro, oo ardeyga wuxu heli fursad uu mas'uul uga noqdo waxbarashadiisa. Wada hadla waxbarashada waxa lagu fiirin sidii loo hirgaliyay qorshaha waxbarashada. Aad bey muhim u tahay in adiga oo ardeyga ah iyo waalidka ka soo qeyb-galan kulankaan, oo su'aalihiina weeydiisatiin.

Waxbarashada luqada hooyo iyo caawinada qaaska ah

Miyuu canugaada luqadiisa hooyo eheyn iswiidhish? Hadii ey sidaas tahay canugaada wuxu xaq u leeyahay in loo dhigo luqadiisa hooyo, hadii oo luqadaas aqoon fiican ka leeyahay iyo guriga aad ku wada hadashiin. Arrintaan waxaa la xalinkara hadii oo macallin jiro. Canugaada wuxu xaq u leeyahay caawinaada waxbarashada qaaska ah. Dugsiga sare barnaamishka bilaawga ah waxa lagu dhigaa koorso oo luqad barasho ah oo lagu talagalay ardeyda wadanka Iswiidhan ku cusub. Ardeyda oo soo dhigteen dugsiga aasaasiga waxa lagu caawin barnaamishka bilaawga, tusale ahaan barnaamishka barasho shaqada ama barnaamishka shaqsiga.

Ardey oo dhigto barnaamishyada qaranka midkood oo dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman, oo markaas halis ku jiro inuu waxbarashada shahaado ka helidoonin wuxu xaq u leeyahay inuu caawinaad qaas ah la siiyo. Ardeyga, waalidka, macallinka iyo maamulaha dugsiga baa wada kulmaayaan, oo waxey ka wada heshiinaayaan sida ardeyga loo caawini lahaa, waxa dugsiga uu suubin karo, waxa uu ardeyga suubinkaro siduu ku helo shahaadada E, oo sidaasna ku baaso.

PRODUKTION: JUPITER REKLAM. BILDER: MASKOT, ISTOCK, MICHAEL MCCLAIN, THINKSTOCK. ILLUSTRATÖR: HELENA HALVARSSON. TRYCK: ÅTTA45.

Skolverket

skolverket.se/nyanlanda